

GOBOLKA MAINE

MAXKAMADDA DEGMADA

Goob \_\_\_\_\_

Lam. Galka Maxkamadda \_\_\_\_\_

Dacweeye: \_\_\_\_\_

shakhsi ahaan iyo ka wakiil ahaan:

\_\_\_\_\_

ka wakiil ahaan:

\_\_\_\_\_

lid

Eedeysane: \_\_\_\_\_

ka wakiil ahaan:

\_\_\_\_\_

AMAR KA-BADBAADIN XASARADEYN

5 M.R.S. § 4655

Kadib ogeysiis iyo  fursad la bixiyay oo ku saabsan dhegaysi buuxa  dhegaysi buuxa oo ah waxa ka jira Dacwadda Ka-badbaadin Xasaradeyn, iyada oo ay joogaan dhinacyada soo socda:  Dacweeye

Eedeysane,

**WAXAY MAXKAMADDU GO’AAMISAY SIDAN SOO SOCOTAA:** *(calaamadee kaliya sanduuqyada khuseeya)*

(1) dacweeyaha waxa xasaradeeyay Eedeysanaha;

(2) dhinacyadu waxay oggolaadeen Amarka soo socda iyada oo aan la helin xasaradeyn.

**SIDAA DARAADDEED, waxa la AMRAY SIDAN SOO SOCOTA:** *(calaamadee kaliya sanduuqyada soo socda)*

**Haddii dacweeyuhu leeyahay shaqaale, ereyga “dacweeye” waxa ku jira shaqaalahaas.**

(A) Waxa Eedeysanaha laga mamnuucay inu xasaradeeyo, u hanjabo, faro-saaro, faro-xumeeyo, weeraro ama si kale u xumeeyo dacweeyaha iyo, haddii ay khuseyso, shaqaalaha dacweeyaha.

(B) Waxa Eedeysanaha laga mamnuucay inu tago goobta hoyga ama hantida dacweeyaha.

(C) Waxa Eedeysanaha laga joojiyay inu qaso ama burburiyo hantida dacweeyaha.

(D) Waxa Eedeysanaha laga joojiyay inu si ku celcelis ah oo aan lahayn sabab caqli-gal ah, dabagalo dacweeyaha.

(E) Waxa Eedeysanaha laga joojiyay inu, si ku celcelis ah oo aan lahayn sabab caqli-gal ah, u joogo ama ku dhawaado guriga, dugsiga, ganacsiga ama goobta shaqo ee dacweeyaha.

(F) Waxa Eedeysanaha laga joojiyay inu wax ah xidhiidh, toos ah ama toos ahayn, la yeesho dacweeyaha.

(G) Waa in Eedeysanaha saaro, burburiyo ama soo celiyo ama amro saarista, burburinta ama celinta sawirada shakhsi, oo joojiyo faafinta sawirada shakhsiga waxana laga mamnuucay wax ah faafin mustaqbal oo ah sawirada shakhsiga.

(H) Waxa Eedeysanaha laga mamnuucay inu burburiyo, wareejiyo ama farofareeyo baasaboorka dacweeyaha ama dokumenti imigarayshan oo kale oo u haysto Eedeysanuhu.

Fiiri waraaqaha dheeraadka ah, ee halkan loo soo raaciyay tixraac ahaan.

**JEBINTA AMAR KU YAALLA BAARAGARAAFYADA (A) ILLAA (H) WAA DAMBI NOOCIISU YAHAY D WAXANA KALE OO LAGA YAABAA INU YAHAY AMAR-DIIDDO MAXKAMAD.**

**Waxa kale oo la AMARAY SIDAN SOO SOCOTA:** *(calaamadee kaliya sanduuqyada khuseeya)*

(I) Waxa dheeraad ahaan la AMRAY: \_\_\_\_\_

Fiiri waraaqaha dheeraadka ah, ee halkan loo soo raaciyay tixraac ahaan.

**JEBINTA BAARAGARAAF “I” WAA AMAR-DIIDDO MAXKAMAD.**

**AMARO XUKUN LACAG**

Waa in Eedeysanuhu siiyo dacweeyaha, lacag ah \$ \_\_\_\_\_ laga bilaabo hadda, oo ah magdhow ku saabsan khasaare soo gaadhay dacweeyaha sababta oo ah natiijo toos ah oo ka timid xasaradeyn, waxana la socda fulin.

Waa in (Eedeysanuhu) (dacweeyuhu) siiyo \_\_\_\_\_ lacag ah \$ \_\_\_\_\_ taasoo ah kharashka la-talinta; lacag ah \$ \_\_\_\_\_ oo ah kharashka maxkamadda. Lacag-bixinta waa in lagu sameeyo gudaha \_\_\_\_\_ maalmood, waxana la socda fulin.

Waa in Eedeysanuhu siiyo \_\_\_\_\_ lacag ah \$ \_\_\_\_\_ sababta oo ah kharashyo la xidhiidha saarista, burburinta ama soo celinta sawiro shakhsi.

**DIGNIIN: Haddii laga baaqdo in la bixiyo lacagta ku taalla amarada xukunka waxay noqonaysaa Amar-diiddo Maxkamad waana la fulin karaa sida xukun madani oo kasta.**

**DIGNIIN KU SOCOTA DACWEYAYHA: IN ALAALE INTA AMARKANI JIRO, WAA INAD ADEECDID. QOFNA, WAXANA KU JIRA DACWEYAYHA, KUMA SIIN KARO OGGOLAANSHO AD KU JEBISID QODOBADA AMARKAN.**

Amaradani waxay jirayaan hadda laga bilaabo waxana ay awood iyo saameyn buuxda lahaanayaan illaa \_\_\_\_\_, iyada oo u wax ka beddelo ama u joojiyo amar maxkamad ama Garsoore mooyaane.

Koobiyada amarkan waxa u karaanigu siin doonaa hay'adda fulinta sharciga ee awood ku leh goobta deganaanshaha ee dacweeyaha. Waxa la AMRAY in koobi ah AMARKAN gacanta laga saaro Eedeysanaha waxana gacanta ka saaraya \_\_\_\_\_, ama hay'ad fulin sharci oo kale oo amar haysata. *(hay'adda fulin sharci)*

Taariikh: \_\_\_\_\_

Garsoore, Maxkamadda Degmada

Koobi dhab ah, xaqiijin: \_\_\_\_\_  
(Ku-xigeen) Karaaniga

\*\*\*\*\*

Markay ahayd \_\_\_\_\_, waxan gacan ka saaris u sameeyay Amarka Ka-badbaadin Xasaradeyn inta an koobi gacanta ka saaray Eedeysana oo jooga \_\_\_\_\_

Taariikhda dhalasho ee Eedeysanaha \_\_\_\_\_

Magaca Sarkaalka amar haysta oo ah xuruuf kala go'an

Saxeexa Sarkaalka amar haysta